


JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
XAFIISKA NOOTAAYAHA & LATALINTA
ARRIMAHA SHARCIGA EE TAYO
MUQDISHO - SOOMAALIYA



جمهورية الصومال الفدرالية
مكتب تيو لتوثيق العقود
والإستشارات الشرعية
مقديشوا - الصومال



SHARCIGA DHISMAHA SHIRKADDA
QUDUS ALUMINIUM



Muqdisho-SOOMAALIYA

2024

UJEEDO:- DHISID SHARCIGA SHIRKADDA QUDUS ALUMINIUM

Maanta oo ay taariikhdu tahay **14/08/2024**, Anigoo ah **Dr. Maxamed C/Ilaahi Maxamed "Max'ed Notaayo"**, Lehna Nootaayaha Tayo, Xafiisna ku leh Wadada Koowaad ee Suuqa Bakaaraha dhabarka Danbe ee Hotel Waheyn ee Magaalada Muqdisho, Waxaa Xafiiskayga iigu yimid Mudanaha hoos ku Xusan:-

1- **ABDIRAHMAN MOHAMED FARAH**, Somali ah, Degan Muqdisho, Lehna Warqada Sugnaan No.660189/D/hoose ee Xamar. Ahna Milkiilaha Shirkadda

Mudanahan Kor Ku Xusan Isago Oo Caafimaad Qaba, Caqligiisa Taam Yahay, Cid Heshiiskan Ku Qasabtayna Aysan Jirin Qowl Iyo Ficilba, Wuxu I Weediistay Inaan U Qoro Heshiis Ku Saabsan Dhismo Sharci Shirkadeed Oo Ka Kooban Qodobada Hoos Ku Qoran:-

QODOBKA 1-AAD

**MAGACA IYO ASTAANTA SHIRKADDA
MAGACA SHIRKADDA QUDUS ALUMINIUM**



QODOBKA 2-AAD

WAQTIGA LA AASAASAY SHIRKADDA

Shirkadda SHIRKADDA QUDUS ALUMINIUM, Waxaa La Aas'aasay 2023 Bishii August, Waxaana Lagu Aas'aasay Magaalada Muqdisho Degmada H/Wadaag Ee Caasimadda Dalka Soomaaliya.

QODOBKA 3-AAD

XARUNTA SHIRKADDA

Xarunta Shirkadda SHIRKADDA QUDUS ALUMINIUM, Waxay Ku Taala Muqdisho, Waxayna Xafiisyo Iyo Laamo ku Yeelan Kartaa Dhammaan Dalka Gudahiisa Iyo Dibaddiisaba.

QODOBKA 4-AAD

NOOCA SHIRKADDA.

Shirkaddani Waa Shirkad Saamiley Xadidan (Private Liability Company) Haddaba Saamile Kaste Waxuu Mas'uul Ka Yahay Hatidiisa Ku Jirto Shirkadda Inta Ay Dhantahay.

QODOBKA 5-AAD
UJEEEDADA SHIRKADDA

Ujeeddada Shirkaddu Waa:

- Sodajinta Agabka Aluminium & Dhismaha Nuucyadooda kala Duwan
- Qaadashada Qandaraasyada Ay Bixiyaan Hay'adaha iyo Dawladda
- Qabasha Adeega Saadka Iyo Qeybintooda (Logistic Service and Supplies)
- Gudashada Howl kasta oo la Xiriirta Maalgelinta Dalka.
- Abuuridda Dakhli Cusub Oo Wax Looga Qabanayo Shaqa La'aanta Dalka Ku Baahsan
- Fulinta Mashaaricda Maalgelinta la xiriirta iyo hormarinta dalka
- Keenida Farsamo Cusub Oo Ku Haboon Duruufaha Dalka.
- In ay qayb wayn ka qaadato dhisidda dhaqaalaha iyo horumarka bulshada Somaliyeed
- In ay abuurto ila Dhaqaale Iyo Adeegyo Ay Ka Faa'idaystaan Bulshada Qeybaheeda Kala Duwan.

QODOBKA 6-AAD

RA'SUMAALKA SHIRKADDA IYO SIDA LOO KALA LEEYAHAY.

Raa'sumaalka Shirkadda waa \$70,000 (Todobaatan Kun oo doller). Waxaana ku talagalka Shirkaddu yahay in Raa'sumaalka shirkadda la kordhiyo ayada oo loo marayo in sheerer loo furo maalgashadayaasha Cusub..

NO	MAGACA MILKIILAHA	QIIMAHA	BOQOLEY
1	ABDIRAHMAN MOHAMED FARAH	\$70,000	100%

QODOBKA 7-AAD

KORDHINTA IYO DHIMIDDA RA'SUMAALKA SHIRKADDA

Maaliyadda shirkadda waa la kordhin kara, waana la dhimi karaa, haddii ay Ku Soo Biiran Saamiley Lana Waafijiyo Sharciga Shirkadda.

QODOBKA 8-AAD

GUDDOONKA SHIRKADDA

Gudoomiyaha Ugu Horreeya Ee Shirkadda Waa Mudane **ABDIRAHMAN MOHAMED FARAH** Waxuuna Awood Buuxda U Leeyahay Maamulka Guud Ee Shirkadda, Sida In Uu Lacag Ku Shubi Karo Kana Saari Karo Bangiyada Dalka Iyo Dibadaba, Saxiixi Karo Jeegaga SHIRKADDA.

QODOBKA 9- AAD


MUDADA JIRITAANKA SHIRKADDA.

Mudada Jiritaanka Shirkadda waa 50 Sano.

QODOBKA 10
HESHIISKAN WUXUU KA KOOBAN YAHAY
10 QODOB 1 COVER , 4 BOG IYO 2 NUQUL OO ORJINAAL IYO KOOBI AH.

SAXIIXA MILKIILAHA

ABDIRAHMAN MOHAMED FARAH



(XAFIISKA NOOTAAYAHA)

REP. 1120/T.P.N/24, Tr. 14/08/2024, Muqdisho, Anigoo ah Nootaayaha Tayo:- Dr. Maxamed C/llaahi Maxamed "Max'ed Notaayo", Waxaan Sugayaa in Saxiixa Kor Ku Xusan uu yahay Saxiixii Runta ahaa waxaan halkan ku caddeynayaa in heshiiskan dhismaha sharciga Shirkadda ee kor ku xusan uu yahay mid sax ah oo waafaqsan shareecada islaamka iyo shuruucda madaniga ah ee Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya, islamarkaana uu saxiixay milkiilaha Shirkadda Nootaayaduna waxey hubisay magacaas uu yahay kan dhabta ahaa ee uu lahaa, waxaana lagu qoray Diiwaanka guud ee Nootaayada.

NOOTAAYAHA

Dr. Maxamed C/llaahi Maxamed "Max'ed Notaayo"

660189



576420



DOWLADDA HOOSE EE MUQDISHO
MUNICIPALITY OF MOGADISHU
WARQADDA SUGNAANTA
Certificate of Identity Confirmation

DUQA MAGAALADA MUQDISHO WUXUU CADEYNAYAA IN SAWIRKA IYO SUUL SAARIDDA HOOS KU TILMAAMAN UU YAHAY QOFKA HOOS KU XUSAN:
(The Mayor of Mogadishu hereby certifies that the person whose picture and thumb print appears below has the following details:)

MAGACA Full Name	ABDIRAHMAN MOHAMED FARAH
TAARIKHDA DHALASHADA Date of Birth	01-Jan-1981
GOOBTA DHALASHADA Place of Birth	ABUDWAK
NUMBERKA KAARKA AQOONSIGA ID number	660189
JINSI Gender	Male
XAALADDA GUURKA Marital Status	Married
DEGGAN Address	Howlwadaag
MAGACA HOoyADA Mother's full Name	HAWO GULED HASSAN
TAARIKHDA LA BIXIYAY Date of Issue	23-July-2024
SHAQADA Occupation	GANACSADE



Right Thumb Print



Duqa Magaalada ee Muqdisho
Mayor of Mogadishu
Yuusuf Xuseen Jimcaale





FOOMKA BIXINTA DUKUMINTIGA

Tr. 14/08/2024

Aniga oo ah **Maxamed Cabdi Cali** waxaan halkaan ka cadeynayaa in aan ku wareejiyay **C/raxmaan Maxamed Faarax** oo ah Milkiilaha Shirkadda **Shirkadda Qudus Aluminium & Construction Company** Dukumiintiga **Original** Caddeynta **Rep No. 1120/T.P.N/24, Tr. 14/08/2024**, faah faahintiisuna tahay sidan soo socota:

Magaca Loo Caddeeyaha	Shirkadda Qudus Aluminium & Construction Company
Taariikhda Caddeynta	14/08/2024

Aniga oo ah **C/raxmaan Maxamed Faarax**, Leh Tel No. **0615000580**, Degan **Muqdisho** Waxaan Halkaan ka Cadeynayaa in aan ka Qaday Xafiiska **Nootaayaha Tayo** Dukumiintiga Caddeynta faah faahinteedu Sare ku cadahay **Shirkadda Qudus Aluminium & Construction Company**.



SAXIIXA DUKUMINTI BIXIYAHA

Maxamed Cabdi Cali

SAXIIXA DUKUMINTI QAADAHA

C/raxmaan Maxamed Faarax

C/raxmaan Maxamed Faarax